

KU TIIRSANAANTA DAWLADDA

WAXYAABAHA AAD U BAAHAN
TAHAY INAAD OGAATO

Noofeembar
2025

Dadka qaar ee codsanaya kaadhka ogolaanshaha ama fiiso ay ku galaan Mareykanka waa inay ka gudbaan tijaabada “ku tiirsanaanta dawladda”. Xaaladahaas, saraakiisha socdaalku waxay eegaan haddii qofku mustaqbalka si weyn ugu tiirsanaan doono dawladda si uu u helo taageero.

Maamulka Trump ayaa dhawaan soo jeediyay isbeddel lagu sameeyo tijaabadan, **balse weli lama dhaqan gelin**. Saddex qodob oo muhiim ah oo qoysaska muhaajiriinta ay u baahan yihiin inay ka ogaadaan “ku tiirsanaanta dawladda” waa:

1

INTA BADAN DADKU KAMA WELWELSANA WAXYAABAHA KU SAABSAN KU TIIRSANAANTA DAWLADDA GABI AHAANBA

- Ku tiirsanaanta dawladda cid walba ma codsan karto.
- Haddii aad hore u haysato kaadhka ogolaanshaha, ama aadan hadda haysan waddo aad ku heli karto, arrintani kuma saameyneyso.
- Keliya dadka si toos ah u raadinaya kaadhka ogolaanshaha iyagoo u codsanaya xubin qoyska ah, ama dadka doonaya inay dalka Mareykanka ka soo galaan dibadda, ayaa laga yaabaa in lagu dabaqo tijaabadan.
- Muhaajiriin badan, sida qaxootiga iyo dadka magangelyo-doonka ah, waa laga reebaa tijaabada “ku tiirsanaanta dawladda” marka ay codsanayaan kaadhka ogolaanshaha.

QAAR KAMID AH KABABKA DADWEYNHAH AYAA LA TIXGALIN KARAA

2

- Laga bilaabo 19 Noofeembar 2025, maamulka Trump wuxuu soo jeediyay in la joojiyo xeerka “ku tiirsanaanta dawladda” ee Biden, balse weli si cad looma sheegin waxa beddelkiisa noqon doona. Tani waxay adkaynaysaa in la ogaado sida saraakiishu u tixgelin doonaan kababka bulshada marka ay mustaqbalka dib u eegayaan codsiga kaadhka ogolaanshaha.
- Hadda, sharcigii Biden ayaa wali shaqaynaya. Cunto, guri, iyo inta badan barnaamijyada daryeelka caafimaadka looma tixgeliyo.
- Haddii aad hadda helayso kabab dowladeed, joojintooda hadda badanaa ma saameynayso qiimeynta “ku tiirsanaanta dawladda”, balse adiga keliya ayaa og waxa u wanaagsan mustaqbalka qoyskaaga.
- Haddii aad codsanayso kaadhka ogolaanshaha, ama aad qorshaynayso inaad mustaqbalka codsato, la tasho qareenkaaga.

3

KU TIIRSANAANTU KALIYA KUMA KOOBNA KABABKA

- Saraakiisha socdaalku waa inay eegaan xaaladda qofka guud ahaan, ee aysan kaliya ku eegin haddii uu qofku isticmaalay barnaamijyo dowladeed.
- Tani waxay sidoo kale ka mid tahay in la tixgeliyo haddii xubin qoyska ah ama qof kale oo dakhli ama hanti ku filan leh uu ballan qaaday inuu ku taageeri doono. “Dammaanada caawiyaha” iyo arrimo kale oo wanaagsan waxay kaa caawin karaan, xitaa haddii aad hore u isticmaashay barnaamijyo dowladeed.